

## Eray-bixin (Liis errayo cusub ah)

Haddii macluumaadka aad raadineyso uusan ku jirin boggan, ama haddii aad qabtid wax kaloo su'aalo ah, fadlan la xiriir Xafiiska mayd baaraha adigoo u soo diraya emayl [coronial.response@justice.govt.nz](mailto:coronial.response@justice.govt.nz) ama taleefan 0800 88 88 20.

Boggan wuxuu taxayaa ereyo muhiim ah oo la adeegsaday intii lagu guda jiray weeraradii masjidka Christchurch ee baaritaanadii maydadka.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan waxa ay baarayaasha maydadka baaraan iyo waxa dhaca marka qof dhintay loo gudbiyo meyd baare, fadlan ka fiiri bogagga Wasaaradda Caddaaladda [ee adeegyada baaritaanada maydadka](#). Tilmaamaha Wasaaradda ee [adeegyada baaritaanada maydadka](#) sidoo kale waxaa ku jira dulmar guud oo ku saabsan geedi socodka baaritaanada maydadka iyo macluumaad kale oo kaa caawin doona inaad fahanto baaritaanka uu samaynayo madaxa maydadka ee weerarada masaajidka.

Erayga	Macnaha
<b>Erayada guud ee baaritaanka maydka</b>	
Geedi socodka baaritaanada maydadka	Geedi socodka baaritaanada maydadka wuxuu bilaabmaa marka mayd baaraha uu aqballo gudbinta geeri lama filaan ah, rabshad ama shaki leh oo ka timaada booliska ama isbitaalka. Geedi socodka wuxuu ku dhammaadaa marka mayd baaraha uu soo saaro <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ogeysiis ku socda qoyska uu qofka ka dhintay taas oo sheegaysa sababta dhimashada iyo sababaha aan loo samayn baaritaan dheeraad ah; Ama</li> <li>• Shahaado ku saabsan natiijooyinka ee sababaha iyo duruufaha geerida iyo sababaha natiijooyinkaas, ka dib markii la sameeyay baaritaan dheeraad ah.</li> </ul>
Baadhitaanka mayd baaraha	Geedi socodka xog uruurinta iyo ka jawaabista su'aalaha la xiriira geerida loo gudbiyay mayd baadhaha. Baadhitaanku wuxuu ka caawinayaa mayd baadhaha in uu go'aansado, tusaale ahaan, haddii la furayo baadhitaan guud ama in la sameeyo baadhitaan.
Baadhitaanka maydka ee guud	Mayd baadhaha wuxuu qabtaa baadhitaan guud si uu u ogaado wax badan oo ku saabsan qofka yuu ahaa, iyo meesha, goorta iyo sida uu u dhintay. Baadhitaanka guud wuxuu kaloo ka caawiyaa mayd baadhaha inuu sameeyo talooyin ama faallooyin ka hortagi kara geeri taas la mid ah inay dhacdo mustaqbalka. Dhammaan dhimashada loo gudbiyay mayd baadhaha ma aha mid ku lug leh baadhitaan guud ama ka dhalan kara in talooyin la sameeyo.

baadhitaanka maydka ee xadidan.	<p>Haddii mayd baadhuhu u baahdo inuu markhaatiyada ka maqlo si shakhsi ahaan ah, waxay dhegaysiga ku qaban doonaan maxkamadda, kaas oo la yidhaahdo baadhitaanka dhagaysiga maxkamada. Baadhitaannada xadidan markasto laguma qabto qololka maxkamada, si kastaba ha ahaatee - waxaa laga yaabaa in lagu qabto meel kale oo ku habboon.</p> <p>Markhaatiyaasha ayaa bixin kara caddayn waxaana laga yaabaa in su'aalo la is dhaafsado. Qoysaska qofka dhintay, dhinacyada danaynaya, iyo mararka qaarkood xubnaha dadweynaha, ayaa laga yaabaa inay ka qaybgalaan baadhitaanka dhagaysiga.</p>
Dhageysiga waraaqaha	<p>Dhagaysiga 'waraaqaha', mayd baaraha ayaa ku akhrinaya dhammaan caddaymaha xafiiskooda (qolalkooda). Kadibna waxay sii daayaan waxay heleen. Xubnaha qoyska iyo markhaatiyaashu kama soo qaybgalaan dhagaysiga waraaqaha.</p>
Natiijada Baaritaanka	<p>Warbixin qoran oo ku saabsan xaqiiqooyinka dhimashada oo ay ku jirto sababaynta meyd baaraha. Talooyinka ama faallooyinka ka hortagi kara geeri tan la mid ah inay dhacdo mustaqbalka waa lagu dari karaa, laakiin had iyo jeer laguma daro.</p> <p>Natiijadu badanaa waa tallaabada ugu dambaysa ee geedi-socodka baaritaanada maydadka.</p>
Mayd baare	<p>Garyaqaan u qalma oo loo magacaabay sarkaal garsoor si uu u baaro sababta iyo xaaladaha geerida lama filaanka ah, rabshadaha ama shakiga leh.</p>
Sargaalka mayd baaraha	<p>Sarkaalka mayd baaraha waa madaxa Mayd baarayaasha ee maxkamada.</p>
Mayd baarayaasha maxkamada	<p>Mayd baarayaasha maxkamada waxay ka kooban yihiin Sarkaalka mayd baaraha iyo mayd baarayaal wakhti buuxa shaqeeya iyo kaaliyeyaal mayd baare oo wakhti gaaban shaqeeya, iyaga oo taageero ka helayo Qaybta Adeegyada geedi socodka mayd baadhayaasha ee Wasaaradda Caddaaladda.</p>
Sharciga maxkamada ee mayd baadhaha	<p>Baaxadda ama xaddidaadda awoodda ama awoodda Mayd baadhayaasha ee maxkamada ama mayd baadhaha.</p>
Soo gudbinta	<p>Dood loo soo bandhigay mayd baadhaha. Waxay noqon kartaa hab qoraal ah am hadal. Xaaladdan, soo gudbinta waxaa ka mid ah arrimaha iyo welwelka ay u soo gudbiyeen mayd baadhaha qoysaska dadka ka dhintay, iyo dhinacyada danaynaya.</p>

Caddaynta	<p>Macluumaadka la ururiyey si ay u taageeraan kiiska. Caddaynta waxaa ka mid noqon kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qoraal ama odhaahyo hadal ah oo ka imaada makhraatiyaasha</li> <li>• Dukumentiyada, sawirrada, khariidadaha iyo duubitaanada.</li> </ul>
Dhinacyada danaynaya	<p>Qoyska ugu dhow ee qofka dhintay waxay xaq u leeyihiin in lala socodsiiyo oo ay ku lug yeeshaan go'aammada qaarkood ee la xiriira baaritaanka qofka dhintay. Dhinacyada danaynaya waxay noqon karaan dad ama ururo kale oo mayd baadhahu u arko inay iyaguna dano gaar ah ka leeyihiin qofka dhintay. Danahoodu waxay u baahan tahay inay ka badan tahay, ama ka duwan tahay, xubin ka mid ah dadweynaha guud.</p>
Arrimaha muhiimka ah	<p>Dhacdooyinka muhiimka ah inta lagu guda jiro geeddi - socodka baaritaanka maydka ee dhinacyada danaynaya ay u baahan yihiin in si rasmi ah loogu wargeliyo. Tusaalooyinka arrimaha muhiimka ah waxaa ka mid noqon kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Furitaanka iyo xidhitaanka baadhitaanka guud</li> <li>• Meesha iyo goorta baaritaanka dhagaysiga la qabanayo.</li> </ul>
Caawinta sharciga	<p>Caawinta sharciga waa maalgelinta dawladda si ay u bixiso matalaadda sharciga, gaar ahaan dadka aan awoodin qareen. Kiisaska ku baaritaanka maydadka, maalgelinta caawinta sharciga ah ayaa loo heli karaa oo keliya haddii mayd baadhuhu go'aansado inuu sameeyo baadhitaan dhageysi maxkamad.</p>